

# Dharka Maaskarada si Loo Yareeyo Fiditaanka COVID-19

## Faa'idada ku jirta afka oo maro lagu xirto

Xarunta Xakamaynta Xanuunada iyo Ka Hortagu Waxa ay dhiiri galinaysaa in maro afka lagu xirto maxaa yeelay:

- Waxa ay hoos u dhigtaa in uu fayraska COVID-19 fido
- Waxa ay ka hor tagtaa dadka xanuunka qaba ee an is ogayn in ay fidiyaan xanuunka
- Qarash kaaga ma baxayo maxaa yeelay waxaad ka samaynsan kartaa alaabta guriga kuu taal
- Maaskaradu qof ka gashan ka ma difaacdo fayraska. Qaliinka kuwa loo isticmaalo ee la dhaho N-95 ayaa gabaabsi ah oo u baahan in loo kaydiyo shaqaalaha caafimaadka

## Sidee loo xirtaa maaskarada



Maaskarada dharka laga sameeyo waxa loo xirtaa:

- Afka iyo sanku ku balaadhi marada. Hubi in aanu meel banana u dhaxayn wajigaaga iyo maaskarada
- Ku xidh cinjir ka dibna dhegta ku soo xir
- Ha la haado lakabyo dhar ah
- Waa in aanu neefta kugu xirin
- Waa in la dhaqi karo ayada oon qaabkiisii wax b aka badalmayn

## Goor ma Ayaan isticmaalaa maaskaro?

- Ku isticmaal meelaha la isugu imaanayo sida dukaanada laga adeegto.
- Iyo meelaha kale ee ay adag tahay in dadku masaafad isku jirso.

## Xataa hadii aan xirto maaskaro ma in aan dadka kale ka fogaadaa?



Haa, waa in aad u jirsataa 6 fiit dadka kale.

Maaskaradu maaha wax lagu badalayo arinta ah in dadku masaafad isku jirsado, waa talaabo kale oo lagu xakamaynayo xanuunka.

## Meeqa jeer Ayaan dhiqi karaa maaskarada?

- Mar kasta oo aad isticmaasho iska dhaq.
- Mashiinka dharka lagu dhaqo ay ku filan oo nadiifin kara.

## Sidee Ayaan isaga saari karaa maaskarada?



Iska ilaali in aad taabato afka ama indhaha marka aad iska saarayso ka dibna qacmahaaga dhaq si degdeg ah.

## Yaan loo ogolayn in ay isticmaalaan maaskaro?

- Caruurta ka yar 2 sano.
- Dadka qabab xanuunada neefsasha
- Dadka aan iska saari Karin maaskarada ayadoo la caawiyo mooyee

### Sources:

WHO - <https://www.who.int/emergencies/diseases/novel-coronavirus-2019>  
CDC - <https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-nCoV/index.html>